

Ma dooneysid miyaa inaad carruurtaada u dirtid iskuulka?

Agrin maqaalkan intaadan go'aan gaarin

Mardhow waxaa dib u furmayo iskuulada. Waalidka qaarkood ma doonayaan iney carruurtooda dib ugu diraan iskuulada. Maxaa habboon inaad sameysid? Halkaan ayaan kuugu heynaa jawaabaha.

Waalidka qaarkood waxay ka cabsanayaan iney carruurtooda caabuqa (covid-19)- karoona-virus kasoo qaadaan iskuulada laakiin maahan qatar caafimaad inaad carruurtaada iskuulka u dirtid, sidaas waxaa dhahday Guri Melby oo ah wasiirad ka tirsan dowladda Norway.

-Anigu waxaan rabaa in waalidku iskuulka u soo diraan carruurta. Carruurta badankood iney iskuulka tagaan wax qatar caafimaad oo ku sugan malaha laakiin haddii laga fursan waayo guri-joogista waxaa macquul iney cashiradooda ku qaataan guriga, hadalkaan ayey Guri Melby ku dhahday wargeyska Aftenposten.

Ma waxaad damacsantahay inaad carruurtaada guriga ku heysid? Haddii aad sidaas damacsantahay waa inaad ogaataa afartan shey ay hoos ku qoran:

1-Carruurta u nugloon caabuqa korona viruska looma dirayo iskuulada:

Ardayda u nugloon caabuqan waa iney joogaan guryahooda. Sidaas waxaa wargeyska Aftenposten u sheegtay wasiirada Guri Melby taariikhdu markii ay aheyd 21. April oo aheyd markii dib loo furay iskuulada. Carruurta qaar-kood waxay qabaan waalid, qaraabo iyo dad waaweyn oo jiran sidaas dara-adeedna ah kuwa u nugul xanuunkan. Kahor inteysan carruurta iskuulka kusoo laaban waa muhiim in dadkaasu la xiriiraan iskuulka ama dhaqtarkooda gaar ah si ay xaaladooda caafimaad ula socdaasiyaan.

2-Iskuuladu si isku mid ah uma wada caawin karraan carruurta

Macalimiintu waxay ku qasbanyihiin iney fasalada joogan hada oo dib loo furay iskuulada. Waxaa sidoo kale laga rabaa iney caawiyaan carruurta u nugul cudurka sidaas daraadeed waqti uma



Isbuucyo badan ayaa carruurta Norway aysan iskuulada aadin. Hada iskuuladii dib ayaa loo furay laakiin waalidka qaarkood ayaanan dooneyn iney carruurtooda dib ugu diraan iskuulka.

hayaan iney caawiyaan carruurta kale ay guryaha lagu celiyey sabab la'aan.

Keliya carruurta u nugul cudurkaan ayaa caawimaad dheeraad ah ka helayo macalimiinta laakiin carruurta waalidkoodu u nugul yahay cudurka oo sidaas daraadeedna iskuulka looga celiyey waa iney waalidku caawiyaan carruurtaas.

Haddii waalidku go'aansado inuu carruurtiisa u dirin iskuulka isaga oo ka baqayo in cudurka loo keenno, iskuulka waajib miyey markaas ku tahay inuu ilmahaas caawimaad siiyo? Su'aashaan markii la weydiyey waxay wasiirad Guri ku jawaabtay: "Maya, waalidku waa iney carruurtooda caawiyaan haddii ay iskuulka uga reebaan sababa kale sida in waalidku isagu caafimaadkiisa u baqo"

3-Dhammaan carruurta oo dhan waxay xaq u leeyihiin waxbarasho

Norway waxbarashada carruurta waa waajib laakiin iskuulku waajib maahan. Taas micnaheedu waa in waalidku go'aamin karro iney carruurtooda iskuulka ka celiyaan laakiin waalidka I yagana waxaa waajib ku ah iney hubiyaan carruurta iney waxbarashadii loogu talagalay sii wataan.

Waa iney carruurta qaadataa cashiradii loogu talagalay waalidkuna waa inuu tusin karaa inuu carruurtiisa waxbari karro haddii uu go'aansado inuu carruurta guryaha ku hayo. Waalidku waajib ayey ku tahay inuu u hoggaansamo sha-

rciga waxbarshada (opplæringsloven) laakiin muhiim maahan inuu yahay macalin ama macalimad si uu carruurtiisa guriga ugu dhigo casharadii iskuulka.

4-Kammuunaha ayaa hubinayo waxa waalidku sameenayo

Kammuunaha ayaa qaabilsan hubinta inuu waalidku raacayo shirciga waxbarashada. Tusaale ahaan kammuunuhu wuxuu hubinayaa in carruurta bartaan inta carruurta kale ay iskuulka jooga ay bartaan. Waxay sidoo kale hubinayaan in waalidku cilmi ku filan leeyahay si uu ilmihisa guriga wax ugu dhigo waa haddii uu go'aansadu inuu ilmaha guriga ku celiyo e.

Wasiirad Guri Melby waxay dhahday " waalid farabadan ayaa carruurtooda aad u caawiyey intii iskuulada xirnaayeen laakiin waxay caawimaad ka helayeen macaliminta laakiin hada caawimaadaas ma helli karaan maadaama macalimiintu shaqeenayaan. Waxay keliya caawimaad xaq u leeyihiin haddii carruurta ay ku jiraan dadka u nugul caabuqan safmareenka ah.



NORSK FOLKEHJELP OSLO

Oversatt til somali av Ismaili Ali Hussein

Grafisk designer: Aniabell Valdes Ochoa

Av Norsk Folkehjelp Oslo, OASEN Kvinner Krysser Grenser

